



## Soo Koobidda

Laga bilaabo Wargeyskii NTAS ee ugu dambeyay lana soo saaray bishii Juunyo 2016, isma baddalin qiimeynta aasaasiga aan ku samaynay handadaadda guud. Wuxaan si gaar ah uga walwalsanahay dadka xag jirka ee ku soo barbaaray waddanka, kuwaasoo waddanka u geysan kara waxyelo, iyagoo aan bixinin ama bixiya ogeysiis yar. Dhacdooyinka, laga bilaabo Wargeyska NTAS ee ugu dambeyay, waxay xoojiyaan tani. Sidaas darteed, kordhinta feejignaanta iyo xogogaalnimada dadweynaha waxay leeyahiin muhiimadda ugu badan. Tusaale ahaan, tani waxay ahayd qeyb muhiim ah oo ka tirsan jawaabta degdeggaa ee laga bixiyay falalkii argagixisada bishii Sateembar, magaalooinka New York City iyo New Jersey.

## Muddada

**La soo saaray:** Nofembar 15, 2016

**Dhicidda:** Maajo 15, 2017

## Tafaasiil Dheeraad ah

- Ma yaraanin walwalka aan ka qabno in xag jirka dagaalka lagu dhiiri geliyo in ay weerar ka fulliyaan gudaha Mareykanka.
- Marka Mareykanka sii wado in uu cadaadis saaro kooxahaan la xariira argagixisada dibadda, waxaa dhici karto in ay kor u kacdo iskudayidda kooxahaan in ay dhiiri geliyaan ama xattaa in ay weerar toos ah ka fulliyaan gudaha Mareykanka.
- Inkastoo aanan haynin xog gaar ah oo lagu kalsoon yahay waqtigaan kuna saabsan shirqool ay soo abaabuleen urarada argagixisada in ay weerar ku soo qaadan waddanka, xaqiiqada waxay tahay in shakhsiyadka dhiirigelinta helo in ay gudaha Mareykana ka fulliyeen, ama isku dayeen in ay ka fulliyaan weerar.
- DHS waxay si gaar ah uga walwalsan tahay in shakhsiyadka ay argagixisada dhiiri geliso iyo xag jirka dagaalka ee ku soo barbaaray waddanka in lagu dhiiri geliyo ama lagu dhalliyio in ay weerar ku qaadaan munaasabadaha ama goobaha dadweynaha.
- Gaar ahaan, xilliga fasaxa waxay fursado dheeraad ah siisaa xag jirka dagaalka in ay bartirmaameedsadaan munaasbadaha dadweynaha iyo meelaha ay dadka isugu yimaadaan.
- Isticmaalka aragagixisada ka sameyso Internetka si ay shakhsiyadka ugu dhiirigeliso dagaalka ama si ay ugu biiraan safafkooda waxay noqotay arrin weyn oo laga walwal.
- Jawiga iminka jira, DHS waxay kaloo ka walwalsan tahay handadaadda iyo dagaalka loo geysto bulshadaha iyo dadka qaar ee daggan waddanka, taasoo ku saleysan diinta loo maleeyo in ay haystaan, dhallashadooda, asal qaran ama jinsigooda.

## Dadaalka Dawladda Mareykanka Kula Jirto Ka Hortagga Argagixisada

- DHS iyo FBI waxay wadaan hoggaaminta ay siiyan iskaashiga gobolka iyo deegaanka ee la xariira jawiga handadaadda iminka jirta. DHS waxay kaloo iskaashi sokke la samaysaa ganacsiga gaarka loo leeyahay si ay u bixiso qiimeynta halista iyo si ay isugu duwdo talaabadaha sugidda ammaanka la xoojiyay ee lala leeyahay milkiileyaasha ganacsiga iyo hawl wadeenada. Dadweynaha waxay arki doonaan kordhinta ciidaanka hirgelinta



# Siistemka Qaranka Ogeysiiska Argagixisada Wargeyska

[www.dhs.gov/advisories](http://www.dhs.gov/advisories)

TAARIKHDA LA SOO SAARAY: Talaado, Nofembar 15, 2016

sharciga iyo sugidda ammaanka, gaar ahaan agagaarka damaashaadyada waqtiyada fasaxyada qaar iyo meelaha kale ee sida balaaran leysugu yimaado.

- FBI waxay baaritaan ku haysaa hawlaha argagixisada suurtogalka ah ee la xariira handadaadda ka jirta Mareykanka oo idil. Madaxda federaalka, gobolka, iyo deegaanka waxay iskuduwaan talaabado badan oo ku saabsan hirgelinta sharciga iyo fullinta xariirka lala leeyahay bulshada si wax looga qabto handadaadda soo xoogeysaneyso.

## Noocyada Ogeysiinta

### Wargeyska

Waxay sharaxdaa wararka iminka jira ama sasaanka guud ee ku saabsan handadaadda argagixisada.

### Digniinta Sare

Waxay ka digtaa handadaadda argagixisada lagu kalsoonaan karo in loo geysto Mareykanka.

### Digniinta Nala Soo Deristay

Waxay ka digtaa handadaadda argagixisada lagu kalsoonaan karo, cayiman, iyo nala soo deristay in loo geysto Mareykanka.

### Sida Aad u Geysan Kartid Kaalmo

- Waxaad hawlaha la tuhmi karo u soo sheegtaa ciidanka hirgelinta sharciga ama saraakiisha ammaanka dadweynaha ee sida ugu wanaagsan u habbeysan in ay ka jawaabaan kana bixiyaan tafaasiil cayiman oo ku saabsan tilmaameyasha argagixisada.
- Hawlaha la tuhmo ama macluumaadka ku saabsan handadaadda waxaa kaloo la gaarsiin karaa [Fusion Centers](#) iyo [FBI's Field Offices](#) - qeyb ka tirsan Qorshaha Ka Warbixinta Hawlaha La Tuhunsan Yahay Qaranka (Nationwide Suspicious Activity Reporting Initiative).
- Ogow [how to recognize signs of pre-operational planning \(sida loo aqoonsado calaamadaha gorsheynta ka horeysa hawlgalka\)](#) ee la xariirta argagixisada ama hawlaha dambiyada kale.

### Isu Diyaarinta

- Isu diyaari kordhinta ammaanka iyo horay u qorsheyso.
- Meelaha dadka ku badan yahay, mas'uul ka noqo ammaankaada shakhsiga. Madaxa ku haay meelaha sida dedegga ah looga baxo iyo meelaha ugu dhaw ee laga helo shaqaalaha ammaanka. Mar kasta, qaado tafaasiisha xariirka degdegga iyo macluumaadka la xariira baahida gaarka.
- Milkiileyaasha ganacsiga waxaa lagu dhiirigelinaa in ay [Connect, Plan, Train \(Xariirinta, Qorsheynta, Tababarka\)](#), iyo in ay soo Sheegaan si ay u diyaariyaan ganacsatada iyo shaqaalaha.
- Si aad u ogaatid in badan, booqo [Ready \(Diyaar\)](#) iyo [Hometown Security Campaign \(Ololaha Sugidda Ammaanka Magaalada\)](#) ee DHS.



# Siistemka Qaranka Ogeysiiska Argagixisada Wargeyska

[www.dhs.gov/advisories](http://www.dhs.gov/advisories)

TAARIKHDA LA SOO SAARAY: Talaado, Nofembar 15, 2016

## Xogogaal Noqo

- Dawladda Mareykanka waxay bixin doontaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan handadaad kasta oo soo if baxda isla marka la helo macluumaad dheeraad ah. Dadweynaha waxaa lagu dhiiri gelinaa in ay dhageystaan ciidanka hirgelinta sharciga xaafadda iyo saraakiisha ammaanka dadweynaha.
- Waxaan ku dhiirigelineynaa Mareykanka in ay sii wadaan safaradooda, tagaan munaasabadaha dadweynaha, iyo in ay si madax banaan ula xariiraan dadka kale balse adkeyaan feejignaanta iyo la socoshada agagaarka.
- Waaxda Arrimaha Dibadda (Department of State) waxay soo saartaa [international travel alerts and warnings \(la socodsiinta iyo digniinta safarada caalamka\)](#).

**Haddii Aad Aragtid Shay, Sheeg Wuxuu Aad Aragtay™**

**Waxaad hawlahaa la tuhmi karo u sheegtaa hirgelinta sharciga ama wac 911.**

Siistemka Qaranka Ogeysiinta Argagixisada (National Terrorism Advisory System) waxay bixisa macluumaadka ku saabsan arrimaha sugidda ammaanka waddanka iyo handadaadda. Waxaa qeybiya Department of Homeland Security (Waaxda Sugidda Ammaanka Waddanka). Waxaad macluumaad badan ka heli doontaa: [www.dhs.gov/advisories](http://www.dhs.gov/advisories). Si aad telefoonka gacanta uga heshid wararka ugu dambeeyo: [www.twitter.com/dhsgov](http://www.twitter.com/dhsgov).

*Haddii Aad Aragtid Shay, Sheeg Wuxuu Aad Aragtay™ la isticmaalay kaddib marka ruqsad laga soo qaataay Madaxda Gaadiidka Magaalada NY (NY Metropolitan Transportation Authority).*